



Waxaa loo adeegsan doonaa **WAREEGGA I - ADEEG BIXIYAASHA DAKHLIGA**  
**Luuliyo 1, 2023-Juun 30, 2024**

Adeeg bixiyaha Qaaliga ahooww:

Foomkaan waa in la buuxshaa aadna siisaa maal geliyahaaga CACFP, adoo raacinaaya cadaynta dakhliga qoyskaaga, si loo go'aansho u qalmidaada helitaanka heerka Wareegga I ee lacag celinta cuntooyinka iyo macmacaanka la siiyay carruurta ku jira daryeelkaaga.

Sharciga Dib U habaynta Hormarinta oo soo baxay 1996 waxaa ku jiray qodob u ogolaanaaya Adeegyada Bixiyaasha Daryeelka Imaha ee ka qaybgalaaya Barnaamijka Cuntada Daryeelka Carruurta iyo Waayeelka, oo qoyskooda qudhiisu yahay mid danyar ah, inay u qalmaan codsashada cuntooyinka la siiyo carruurta ku nool guriga xubnaha qoyska Adeeg bixiyaha. Haddii adeeg bixiye la go'aansho inuu u qalmo Heerka Wareegga I ee lacag celinta lagu baxsho carruurta ka diiwaan gashan daryeelka sabab la xariirta in dakhliga qoysku yahay ama ka hooseeyo heerka cuntooyinka Qiimo Jaban, adeeg bixiyaha ayaa sidoo kale u qalma inuu helo qiimaha 'Wareegga I' ama 'Ka badan' ee magdhawga carruurtaas xubinta ka ah qoyska adeeg bixiyaha.

Si loo go'aansho inaad u qalanto iyo inkale gunnadaan, fadlan buuxi foomka soo socda ee codsiga kuna celi maal geliyaha CACFP. Maal geliyahaaga ayaa isbarbardhig ku samayn doona dakhliga bishii soo gala qoyskaaga iyo heerarka dakhliga ee hadda degsan si loo go'aansho inaad u qalanto qiimaha 'Wareegga I' ee qarash celinta.

Sida sharcigu qabo, dhammaan dakhliyada ku qoran waa inuu xaqiijiyaa maal geliyaha CACFP. Tani waxay ka dhigan tahay inay qasab tahay inaad u keento maal geliyahaaga nuqullada risiidyada kaladuwan (maaha keliya hal mid) ee mushaarka dhawaan lagu baxshay qof kasta oo kamid ah qoyska oo shaqeeya, laakiin maaha dakhliga ganacsigiisa kasoo gala. Haddii qof qoyska kamid ah uu helo gunnooyinka Amaanka Bulshada (Social Security), lacagta beeshinka ama hawlgabka, Magdhawga Shaqo la'aanta, Caymiska Nolasha, ama barnamij kale oo lamid ah waa qasab inaad keento nuqulka waraaqdii ugu danbaysay ee deeqda oo kasoo baxday barnaamijkaas taasoo muujinaysa cadadka lacagta aad heshay bil kasta. Haddii gunnooyinka aad ka heshay Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP, Barnaamijka Caawimaada Kaalmada Nafaqada) (oo horay loo oran jiray Food Stamps), TANF, ama Food Distribution Program for Indian Reservations (FDPIR, Barnaamijka Cunto Qaybinta ee Dhawrida Dhaqannada Hindida), waa qasab inaad keento waraaqda lacagta lagugu siiyay ee u danbaysay oo sheegaysa cadadka aad heshay, iyo mudada aad xaqa u lahayd. Waxaa sidoo kale qasab ah inaad keento koobiyada jeegaga si aad u cadaysa ilo kasta oo dakhli ayna ku jiraan Taageerada ilmaha iyo Alimony.

Dhammaan deeq bixiyaasha daryeelka carruurta waxaa loo aqoonsan yahay dad iskood u shaqaysta. Sababtaan awgeed, waa qasab inaad keento midkood diiwaannada hadda ee dakhliga ganacsigaaga iyo qarashaadka kaa baxay oo muujinaaya dakhliga xaasilka ah ee hadda kaasoo gala ganacsigaaga, ama, haddii dakhliga xaasilka ah ee kaasoo gala ganacsiga ee sanadka markaas lagu jiro uu muujinaayo heerkaaga hadda ee dakhliga, waxaad keeni kartaa nuqulka foomkaagii ugu danbeeyay ee IRS 1040.

Tilmaamaha:

1. Geli Magaca iyo da'da cunuga laga yaabo inaad codsiga u samaynayso.

2. Ku qor magaca qof kasta oo ku nool "qoyska". "Qoyska" waa koox dad ah oo ku wada nool guri oo wadaaga dakhliga iyo qarashaadka nolosha. Shaqsiyaadkaan ayaa noqon kara qaraabo ama dad aan waxba isku gelin.
3. Qor dakhliga guud kahor intaan laga jarin wax lacago ah, ee ka yimaada dhammaan ilaha dakhliga, ee dhammaan shaqsiyaadka guriga ku wada nool.
4. Ku dar Afarta (4) god ee ugu danbaysa lambarka Amaanka Bulshada (Social Security Number) ee xubinta qoyska ama masuulka saxiixa foomka codsiga. Haddii aan qofkaan haysan Lambarka Amaanka Bulshada (Social Security Number), erayga "NONE" (MA JIRO) waa in lagu qoraa meesha banaan.
5. Ku qor saxiixa, taariikhda saxiixa, ciwaanka, iyo lambarka taleefanka ee qofka buuxinaaya codsiga.
6. Xaqiiji inaad soo qaadato, ama aad u dirto Maal geliyaha, cadaynta, sida kor lagu qeexay, il kasta oo dakhliga qoysku ka yimaado. Ku celi foomka/dukumiintiyada aad buuxisay maal geliyahaaga.

Sida sharciga ah, haddii wax kamid ah xogta kor lagu codsaday aan lasoo raacin codsiga, Maal geliyahaaga CACFP ayaa diidi kara go'aaminta u qalmidaada codsashada lacagta cuntooyinka aad siisay carruurta kugula nool qoyskaaga.

Maal geliyahaaga ayaa sidoo kale go'aamin doona haddii aad buuxisay Shuruudaha 'Wareegga I - Dugsiga' ama 'Wareegga I - Bulshada guud' kahor intaan lagu dhawaaqin inaad u qalanto si toos ah helitaanka qiimaha Heerka I ee cunug kasta oo kale oo daryeelkaaga carruurta ku jira.

Shaxda soo socota waxay muujinaysaa heerka sare ee dakhliga qaybta 'Wareegga I' ee mudada u dhaxaysa **Luuliyo 1, 2023 ilaa Juun 30, 2024.**

**Cabirka u qalmida ee Cuntooyinka "Qiimaha Jaban"**

<b>Tirada Qoyska</b>	<b>Sanad kasta</b>	<b>Bil kasta</b>	<b>Labo jeer Bishii</b>	<b>Labadii Asbuuc ba Mar</b>	<b>Asbuuc kasta</b>
1	26,973	2,248	1,124	1,038	519
2	36,482	3,041	1,521	1,404	702
3	45,991	3,833	1,917	1,769	885
4	55,500	4,625	2,313	2,135	1,068
5	65,009	5,418	2,709	2,501	1,251
6	74,518	6,210	3,105	2,867	1,434
7	84,027	7,003	3,502	3,232	1,616
8	93,536	7,795	3,898	3,598	1,799
<b>Xubin kasta oo dheeraad ah oo qoyska kamid ah</b>	9,509	793	397	366	183

Haddii xubin kamid ah dadka kula nool gurigaaga shaqo la'aan noqdo, cunugaaga ayaa u qalmi kara gunnooyinka kor lagu sheegay inta lagu jiro mudada shaqo la'aanta, marka la cadeeyo in luminta dakhligu ay keenayso in dakhliga qoysku galo heerarka u qalmida.

Haddii ilmo aad Korsatay uu yahay qof kamid ah qoyskaaga, fadkan ku sheeg arintaan codsiga.

Si waafaqsan Sharciga Maraykanka iyo xeerka Waaxda Beeraha ee Maraykanka, Maal geliyaha Hooygaan Daryeelka Maalintii waxaa mamnuuc ka ah inay qof u takoorto ayadoo cuskanaysa sababo isir, midab, wadanka qofka, jinsiga, da'da, ama naafada.

Si aad u gudbiso cabashada takoor, qoraal u dir USDA, Agaasimaha, Xafiiska Dacwada, 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410 ama wac (866) 632-9992 (cod) ama (800) 877-8339 (TTY) ama (800) 845-6136 (Isbaanish). USDA waa adeeg bixiye iyo loo shaqeeye loo siman yahay.

Daacadnimo,

Barnaamijka Cuntada Daryeelka Carruurta iyo Waayeelka

**CODSIGA ADEEG BIXIYAASHA 'WAREEGGA 1 - DAKHLIGA'**  
**BARNAAMIJKA CUNTADA DARYEELKA CARRUURTA IYO WAAYEELKA (CACFP)**

CUNUGA CODSIGA AWGIIS LOO GUDBINAAYO: **Magaca:** \_\_\_\_\_ **Da'da:** \_\_\_\_\_

**OGOOW:**

Haddii aad codsanayso gunnooyinka CACFP adoo wakiil ka ah Cunug Aad korsatay, fadlan calaamadee godkaan  Ilmo La korsaday.

**TILMAAMAHA:**

- (a) Qor magaca dhammaan qof kasta oo qoyskaaga la nool. Xaqiiji inaad kudarto naftaada iyo cunugaaga magaciisu kor ku yaalo. "Qoyska" waa koox dad ah oo ku wada nool guri oo wadaaga qarashaadka nololaha. Shaqsiyaadkaan ayaa noqon kara qaraabo ama dad aan waxba isku gelin.
- (b) Qaybaha Lambarka Amaanka Bulshada (Social Security Number) ee 9 iyo 17 ee Sharciga Qadada Dugsiga Dawlada ayaa qasab ka dhigaaya afarta (4) god ee ugu danbaysa Lambarka Amaanka Bulshada (Social Security Number) ee qofka wayn ee qoyska kamid ah ama masuulka saxiixaaya codsigaan in lagu qoro meesha banaan. Haddii qofkaas uusan haysan Lambarada Social Security, qofkaas waa inuu ku qoraa erayga "NONE" meesha banaan. Sheegista Lambarka Amaanka Bulshada (Social Security Number) qasab maaha, laakiin haddii afarta (4) god ee ugu danbaysa Lambarka Social Security aan la bixin, ama erayga "NONE" aan la gelin meesha banaan, codsiga lama aqbali doono.
- (c) Dakhliga: Qor **DHAMMAAN** dakhliga ka yimaada **DHAMMAAN** ilaha ee la helay bishii lasoo dhaafay kuna soo dhacay isla magaca dakhliga qaatay. Dakhligu waa inuu yahay midka **GUUD**, macnaheeduna yahay, inuu ahaado cadadka la helay **KHOR INTAAN LAGA JARIN** canshuuraha, amaanka bulshada, daymaha, caymiska, iwm. Ku qor cadadka dakhli kasta hoosta godka saxda ah. **Sida lagu sheegay waraaqda sharaxaada, dhammaan dakhliyada waa inuu xaqiijiyaa maal geliyaha CACFP, asagoo adeegsanaaya midkood risiidyada jeega, nuqullada waraaqaha deeqda, nuqullada jeegaga rasmiga ah, ama foomamkii ugu danbeeyay ee IRS-1040.** Haddii aad hadda qaadato Gunnooyinka SNAP, TANF ama FDPIR, iyo haddii cunuga magaciisa kor lagu sheegay lagu daro deeqda, waxaad ku sheegi kartaa lambarkaaga kiiska SNAP, TANF ama FDPIR laynka loo qorsheeyay. HA BUUXININ Qeybta II, u bood Qaybta III. Qaybta III waa in lagu qoraa magaca qoran iyo saxiixa qofka wayn ee buuxinaaya foomkaan iyo taariikhda codsiga la buuxshay. **Haddii aad dagan tahay Guri Milatari oo Gaar ah ama aad hesho mishaarka weerarka, fadlan haku darin gunnooyinkaas xisabata dakhliga.**

**Haddii adigga, ama qof kale oo qoyska kamid ah, uu qaato gunnooyinka SNAP, TANF ama FDPIR, fadlan hoos ku qor lambarka kiiska:**

- Aqoonsiga Lambarka Kiiska SNAP: #** \_\_\_\_\_ **(Maaha lambarka EBT)**
- Aqoonsiga Lambarka Kiiska TANF: #** \_\_\_\_\_
- Aqoonsiga Lambarka Kiiska FDPIR: #** \_\_\_\_\_

**QOR DHAMMAAN XUBNAHA QOYSKA:**

Magaca Xubinta Qoyska:	Da'da:	Wadarta Guud ee Mushaarka Bishii ama Lacagta Faa'iidada Ganacsiga Shaqsiga ah	Cadadka bishii aad ka hesho TANF, Alimony, Fayadhawrka, Taageerada ilmaha	Lacagaha Beeshinka ee Bilaha ah, SSI, Social Security, Magdhawga Shaqaalaha, Magdhawga Shaqo La'aanta, Caymiska iyo Hawlgabka:
1.				

2.				
3.				
4.				
5.				
6.				
<b>(Ogoow: Dakhlga asbuuc kasta x 4.333 asbuuc; dakhlga labadii asbuucba mar x 2.15 asbuuc)</b> <b>Wadarka guud ee Dakhlga Bishii:</b>				

Si waafaqsan Sharciga Maraykanka iyo xeerka Waaxda Beeraha ee Maraykanka, Maal geliyaha Hooygaan Daryeelka Maalintii waxaa mamnuuc ka ah inay qof u takoorto ayadoo cuskanaysa sababo isir, midan, wadanka qofka, jinsiga, da'da, ama naafada. Si aad u gudbisno cabashada takoor, qoraal u dir USDA, Agaasimaha, Xafiiska Dacwada, 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410 ama wac (866) 632-9992 (cod) ama (800) 877-8339 (TTY) ama (800) 845-6136 (Isbaanish). USDA waa adeeg bixiye iyo loo shaqeeye loo siman yahay.

**GANAAXYADA LAGU MUTAYSTO XOGTA KHALDAN:** Waxaan qirayaa in dhammaan xogta kore ay run tahay ayna sax tahay iyo in dhammaan dakhlga qoyska ee aan ku sheegay meesha. Waxaan fahmayaa xogtaan in lagu bixin doono sabab la xariirta qaadashada Deeqaha Federaalka ayna tahay in Saraakiisha Barnaamijku xaqiijiyaan xogta ku qoran codsiga ayna bixinta xog khalidan si kas ah aan ugu baxshay codsigaan ay keeni karto in dacwad la igusoo oogo sida ku cad sharciyada quseeya ee Gobalka iyo Federaalka ee Danbiyada.

**SAXIIXA:**

<b>(Magaca Qofka Wayn)</b>	<b>(4 god ee ugu danbeeya Lambarka SS)</b>	<b>(Saxiixa Qofka Wayn)</b>	<b>(Taariikhda)</b>
<b>(Ciwaanka Guriga Qofka Wayn)</b>		<b>(Taleefanka Gurigga)</b>	<b>(Lambarka Shaqada)</b>

Ma haysto lambarka amaanka bulshada (Social Security Number)

**QAYBTAAN WAXAA BUUXIN DOONA MAAL GELIYAHA HOOYGA DARYEELKA GURIGA:**

Saxiixa: \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_

**Adeeg bixiyuhu ma u qalmaa qiimaha Qaybta I ee lagu saleeyay dakhlga qoyska ama cadaynta tooska ah?**

**(mid goobin geli):        Haa        Maya**